

Xuquuqda Asaasiga ah

Qof walba oo ku nool Oregon wuxuu leeyahay xuquuqo aasaasi ah marka uu ku lug yeelanayo nidaamyada ka dib dhacdada nacaybka/eexda ama dembiga. Waxaad xaq u leedahay:

- Turjubaan – haddii aad galayso booliska isbitaalada, dugsiyada dadweynaha, iyo barnaamijka dowladda ama hay'ada hela maalgelinta federaalka, waxaad xaq u leedahay turjubaan lacag la'aan ah iyo in aad hesho waxyaabo lagu turjumay luqaddo kala duwan ee aad codsato. (Qoddobka VI ee Sharciga Xuquuqda Dadweynaha, Sharciga Dadka Naafada ah ee Maraykanka)
- In laguula dhaqmo si sharaf iyo ixtiraam leh.
- Gelitaanta – waxaad xaq u leedahay in aad yeelato codsigaaga loogu talagalay wax ka beddel macquul ah oo lagu tixgeliyo ee goobaha hoyga dadweynaha haddii aad qabto naafanimu. (Sharciga Dadka Naafada ah ee Maraykanka)
- In aad yeelato qof wax taageera oo dhinacaaga jooga. Waxaa jira waxyaabaha qaarkood oo reeban sida uu dhigayo sharcigu marka la eego deegaanada qaarkood; tusaale sharciga Oregon wuxuu dadka wax taageera ka mamnuucayaa in ay ka tirsanaadaan Xeerbeegtida Guud iyo Wareysiyada Ku Xadgudubka Ilmaha.
- In aad iskaa u daba gasho ama u raadsato nidaamka sharciga madaniga ah ama adiga oo la tashanaya ama sii haysanaya qareen.
- Cadaalad iyo hufnaan marka aad la macaamilayso nidaamyada dowladda – oo uu ka mid yahay in dembiyada si buuxda loo baaro, helitaanka nidaamyada rafcaanka haddii codsiyada loogu talagalay faa'iidooyinka la diiday, oo la codsanayo/gelayo diiwaannada dadweynaha sida uu oggol yahay sharcigu.
- In aadan hadal oo aamusto, aadan ka qayb qaadan, ama si aad u maamusho heerkaaga ku lug yeelashada nidaamyada – Waxaa jira waxyaabo hubaashi ka reeban, oo ay ku jiraan amarka imaanshaha maxkamadda 'subpoenaed'.

Si kastaba ha ahaatee, haddii aad codsi la bilawdo hay'ada gobolka oo loogu talagalay faa'iidooyinka sida SNAP ama TADVS, iwm., waad beddeli kartaa maskaxdaada oo ku saabsan sii wadida nidaamka. Waad la noqon kartaa codsigaaga.

- ☐ In aad doorato in aad la hadasho warbaahinta ama in aadan la hadlin – waa ikhtiyaarkaaga. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan fiiri tilmaamahayaga halka bog ah [Talooyin loogu talagalay la macaamilka Warbaahinta](#).
- ☐ In aad nidaamyada wax ka weydiiso sida ay u ilaalin doonaan qarsoodinimadaada, iyo/ama weydiiso halka macluumaadkaaga lagu wadaagi doono ama lagu keydin doono.
- ☐ In aadan macluumaadkaaga gaar ahaaneed la wadaagin ICE ama hay'adaha socdaalka ee federaalka iyada oo ujeedada laga leeyahay tahay hirgelinta socdaalka ee federaalka ee shaqaalaha gobolka iyo dowladda hoose ama hay'adaha dhaqangelinta sharciga, haddii aysan ku qasbaynin amar uu saxiixay qareen. (ORS 181A.820-181A.829)
- ☐ In aan lagu takoorin iyada oo ku saleysan dabaqadaada la dhowrayo – Sharciyada Oregon iyo federaalka ayaa mamnuucaya takoorka ku saleysan dabaqada la dhowrayo oo dhab ah iyo sida loo arko. Liiska dabaqadaha la dhowrayo wuu kala duwan yahay iyada oo ku xiran halka aad joogto— shaqada, dugsiga, dukaanka, gurigaaga, iwm.

Kani ma aha liiska xuquuqaha oo dhammeystiran, kamana dhigna talo sharci ah. Wixii macluumaad dheeraad ah, [la tasho qareen](#). Waxaad sidoo kale dib u eegi kartaa [guudmarkeena Xuquuqda Dhibbanaha ee Dastuuriga ah iyo sharciga dhibbanaha fal demiyeedka ee Oregon ee loogu talagalay dhibbanayaasha nacaybka/dembiga eexda](#).